# Mahadhadii Daruur Caafimaad
# Iyo Mujaahid Bashiir

Dilkii Axmed Aadan.
Disambar 6$^{dii}$,1986$^{kii}$:

Mareegta Farshaxan
Diisambar ,2009

*- "Waar beerta labada dibi ee qodaya mid baa qoorta hoos u dhiga, culayskuna mid uun buu ku dhacaayee, tani way isku qoor go'dayee oo hawshani inagay ina saaran tahayee hawlgala".*

*Mujaahid* Bashiir (Ihun).

Bishii Diisambar 6 $^{dii}$, gu'gii 1865 $^{kii}$ waxaa la hirgaliyey oo la ansaxiyey xeerka 13$^{aad}$[1] ee dastuurka Maraykanka oo jagaafaha u laabay adoonsigii muddo dheer socday.Taasina waxay guul u noqotay bulshada madawga ah ee ku dhaqan dalka Maraykanka.

Bishii Diisambar horaanteedii gu'gii 2006 $^{dii}$ waxaa masaajidka Al-Furqaan, ee xaafada Xera-Awr kuna yaala magaalada Hargeysa ,salaadii Jimcaha ka dib, ka dhacay inuu Sheekh C/laahi Makaawi uu khudbadiisa ku sheegay inay **waajib**(Ogaal:Diintu waxay faraysaa inaad degaankaaga deeqsinimada ka bilawdo) tahay in la caawiyo dadka soomaaliyeed(wadanka Soomaaliya) ,waxaanu yidhi:" Dadbaa wax aan u ururino dadka muslimiinta ah ee dhibaatada ka soo gaadhay fatahaada Webiyada Iyo daadadka ee Koonfurta Soomaaliya nagu haysta oo magaaladii aanu ka dhex mari la'anahayoo ciyaalkii ayaa na hayasta, oo inaguba **waynagii is dilnay**".

Waxaase geesinimo daljaceyl ku jirto muujiyey qofkii codbaahiyaha ka dhuftay markuu halkaa marayey.Waxaana amaan mutay kuwii taageeray qofkaasi tusayna wadaadka inuu dareen hadlay aanuse ka hadal arin ku salaysan diin, waaqici (reality), iyo dadnimotoona. Wadaado farobadan ayaa dareen kalgaceyl u qaba koonfur(Soomaaliya), diidana gooni go'a wadanka Somaliland iyo wax u qabadkiisa .Sheekha wuxuu afku ka xadey dareenka ay wadaado badan oo kale ka midaysan yihiin oo jooga dalka Somaliland.Waxaa arintani si geesinimo iyo kalsooni leh u cadeeyey ka dib qaraxyadii bishii Sebtember 29,2008 Sheekha galka seefta ka siibay ee Sh.Aadan Siiro,waxaanu yidhi :"Rag baa yidhi ma garanayno waxay doonayaan kuwa Qaraxa gaystay.....Waano garanaynaa waxa ay doonayaan, waxay doonayaan in dalka colaad iyo fawdo ka ridaan kadibna Qaab guracan ku qabsadaan dalkan , waynu ognahay oo waata qaarkeen(wadaadada) cajaladaha loo soo

[1] The Thirteenth Amendment to the United States Constitution

diro, telefoonka lagula soo hadlo, waa wada naqaanaa kuwa cauurta dira, arintuna maanta culimooy inaga ayey ina dul saarantay ee aynu meel saaro dacwiga dadka iyo su'aasha Aakhiro".

Waxaa sidoo kale dabayaaqadii bishii Diisambar,2007 uu Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland qalinka ku duugay go'aan waxtar weyn ummada u yeelan lahaa haddii la hirgaliyo oo ahaa xeerka ka hortegida ku tagri-falida hantida Qaranka iyo la dagaalanka muquqmaasuqa. Go'aankaas oo uu ku saxeexnaa Afhayeenka Madaxtooyada Somaliland ahna la taliyaha arrimaha Saxaafada Md. Siciid Cadaani Mooge ayaa u dhignaa sidan:- "Madaxweynuhu isaga oo tixraacay ogolaanshihii Golaha Wasiirada iyo go'aankii Golaha Wakiilada Somaliland uu hore ugu ansixiyeen [ka hortegida ku tagri-falida hantida Qaranka iyo la dagaalanka muquqmaasuqa.],waxaa uu go'aansaday in uu dhaqan-galo xeerka No.302/2007,oo la xidhiidha ka hortegida ku tagri-falida hantida Qaraka iyo la dagaalanka Musuqmaasuqa. Xeerkaas oo waafaqsan qodobka 75-aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, sidaa daraadeedna ay lagama maarmaa tahay in go'aankaasi si rasmi ah u dhaqan-galo loona fuliyo."

Dabayaaqadii bishaa Diisambar (12/27/2007) ayaa wefti ballaadhan oo ka kala socday guddida doorashooyinka iyo axsaabta Somaliland joogayna magaalada Nairobi si ay uga mid noqdaan goob-joogayaasha shisheeye ee dusha ka ilaalinaya doorashooyinka madaxtooyada, baarlamaanka iyo golayaasha degaanka ee ka dhacayey dalka Kenya, ayaa la kulmay safiirka dawladda Maraykanka u fadhiya Nairobi, Ambasaddor Michael Ranneberger.

Safiirka, Michael Ranneberger, casho-sharaf la sameeyey ka dib wuxuu si gooni ah ula kulmay weftiga Somaliland kuna yidhi hadaladan u baahan daba socod dawladeed iyo xisbiyeed: "Dawladda Maraykanku waxay si fiican u gacansiin doontaa Somaliland sidii loo aqoonsan lahaa, waxana loo baahan yahay in waddamada AU-da culays badan lagu saaro arrintaas, annaguna waxaannu diyaar u nahay in aannu raacno dawladda u horreysa ee ku dhawaaqda arrintaas oo aanu gacan ka geysan doono."

Isla bishaa Diisambar 6$^{dii}$, 1986$^{kii}$ waxaa magaalada Hargeysa iyo dhamaan goboladii woqooyi ee iminka la yidhaa Somaliland ku hoortay daruur caafimaad oo ka dulqaadey daadxoor dhibaato badan u gaysatey degaanka iyo dadkii deganaaba.

Waxay aheyd maalin Sabti ah, qof waliba wuxuu heelan u ahaa u hogaansanida hawlihii maalintaa horyaalay.Hase yeeshee daruurtan da'day habeenkii ayaa siyaabo kala duwan loo qabilay. Dadka qaar waxay ku noqotay laf dhuun gashay oo u qaadanwaa ayey dareemeen, halka damaashaadka iyo mashxaradu is qabsadeen guryo badan oo ku yaalay degaankaa.Waxaa sidoo kale u soo hoyatey ururkii dhaqdhaqaaqa Wadaniga Soomaaliyeed (SNM) guul la taaban karo. Guushani waxay dhabarjab weyn ku noqotay maamulkii Ina Barre oo indhaha ka qarsan jiray galdaloolada ka jiray goboladaa iyo jiritaanka ururka SNM ee ahaa xaq u dirirka u heelanaa inuu awdo galdalooladaa.

Maamulkii ina Barre wuxuu sugay inuu dhamaan hay'adaha dawlada u dhiibo dad u hogaansan isaga kalsooni buuxdana siin kara. Si ay taasi ku suurtogasho wuxuu gacanta ka galiyey dad dhiniciisa ka ahaa xul .Hawlaha loo dirayna ay ka mid aheyd dhalangadiska degaanka iyo dadweynaha dhulka Soomaaliland ah maanta. Waxaa xilligaa joogay maamulka goboladii woqooyi dad abtirsiin hayb la wadaagayey isaga ama xidid ahaan ku soo galay daarada maareynta.

Xilli ay ku beegnayd bishii April 12,1983 waxaa guriga taliyihii qaybta 26 ee ciidamadii Xoogga dalkii Soomaaliya Loogu dabaaldegayey xuskii maalintii xooga qaranka.Hase yeeshee gu'gan waxaa ku lifaaqnaa oo mudnaan gaar ah u yeelayey soo bandhigida iyo muujinta guuldaradii iyo ayaanli'ida ururkii dhaqaaqa wadaniga soomaaliyeed.Waxaa gacanta ciidamadii soo galay sarkaal sare oo ka tirsan dhaqdhaqaaqii wadaniga Soomaliyeed ee SNM. Dhagarqabe Gaani ayaa rabay inuu isagu yeeshan guusha tilmaaman soona bandhigo libintan, kol hadduu tirsanayey inay ku hirgashay maamulkiisa.

Aritan waxaa aad iskugu maandhaafay habaarqabe ina Siyaad iyo dhagarqabe Gaani oo mid waliba dhiniciisa la rabay soo bandhigida libintan mudan xusidda.Waxaase laysku afgartay inuu Gaani habeenkaa keeno sarkaalkaa madasha xaflada, ka dibna u soo duuliyo magaalada Muqdisho si qoorgoyn loogu abaal mariyo.

Dhubuq-dhubuq hore dhabanahays dambey leedahayee gurigii mujaahid Ismaaciil Sh. Ibraahim Sh. Muuse(Ihun) ayaa dhawr mujaahid ooy ka mid ahaayeen Ibraahin Koodadbuur(Ihun),Cabdisalaan Turki, Biixi(Ihun),iwm ay ku falanqaynayeen sidii halbacaad lagu lisay looga dhigi lahaa qorshaha dawladu maleegayso.Rag is gurayee ,guushii[2] waxay raacday xaq u dirirkii SNM oo ku guulaystay inay badbaadiyaan sarkaal Cabdilaahi Askar,gudcur iyo murugana u hilaabay habeenkaa raynraynta lala rabay.

Boobe Yuusuf Ducaale oo ka waramayey dhacdaadasina wuxuu lahaa:"Dhacdadaasi, waxay Ciidamadii Siyaad Barre ee Hargeysa fadhiyay iyo guud ahaanba Taliskiisii ku noqotay Adhax-jab aan hore loo arag iyo dhirbaaxo kulul oo wejiga kaga dhacday. Dhinaca ururkii SNM-na, waxay u ahayd guul aan hore loo arag, waxayna u soo jiiday Sumcad weyn oo Milateri iyo Siyaasadeed intaba. Sidookale, dadweynaha reer Hargeysa iyo guud ahaanba dadweynihii ku dhaqnaa Goboladii Waqooyi, waxay dhacdadaasi mar u ahayd farxad weyn, marna waxay u ahayd naxdin weyn, waayo? Mar waxay ogaayeen ama u caddayd in guusha SNM ka gaadhay Ciidamadii Siyaad Barre ee 26aad, iyaga loogu aari doono oo lagu samayn doono dil, xadhig iyo dhac. Marna, waxay ku faraxsanaayeen guushii la gaadhay".

Tani waxay dhalisay inay shaki ku abuurto habaarqabe Ina Siyaad oo u qaatey inuu guuldaradaa qayb ku lahaa dhagarqabe Gaani. Sidaa darteed wuxuu ina Siyaad goostay inuu dibuhabeyn ku sameeyo maamulkii gobolkii woqooyi galbeed una magacaabo gudoomiyaha gobolka Buule, taliyaha nabad sugidana kornayl Axmed Aadan.

[2] Qoraalka arintaa ku saabsan waxaa si faahfaahsan u qoray mujaahid Boobe Yuusuf Ducaale ee raadso

Axmed Aadan wuxuu ahaan jiray xerow ku biiray ciidamadii dalkii Soomaaliya dabayaaqadii $60^{kii}$,halka uu horaantii $70^{dii}$ ka mid noqday shaqaalihii nabad sugida (NSS). Muddo aad u kooban ayey ku qaadatey Axmed Aadan inuu ku hanto darajadaa kornaylnimada iyo la wadaagida haybta ina Siyaad.Halka dadka ka hor yaqaanay sheegayaan in loo nisbayn jiray hayb kale.Wuxuu gu'gii $1974^{kii}$ ka tirsanaa shaqaalaha nabasugida isagoo ahaa isbatoore.Wuxuu si gaar ah uga tirsanaa sirdoonka safaaradaha(counter-Intelligence).Waxaa aad loogu yaqaaanay dhugdhuglay yar oo uu dhex wadan jiray Xamar uuna kolba safaarad horteeda isla taagi jiray.Wuxuu ku hawlanaa inuu la socdo hawlaha safaarada,dhaqdhaqaaqa shaqaalaha safaaradaha,dadka xidhiidhka la leh,iwm.

> "When I came to Mogadishu, there was one road built by the Italians. If you try to force me to stand down, I will leave the city as I found it. I came to power with a gun; only the gun can make me go".
> By:Siad Barre

Dabayaaqadii $70^{kii}$ ilaa horaantii $80^{kii}$ si fudud ayuu u dalacay ilaa uu ka mid noqday hogaanka sare ee qaybta baadhista NSS-ta, inkastoo aragtidiisu aad ugu yareyd shaqaalaha la shaqeyn jiray oo ku baraarugay markuu noqday taliyaha Nabad Sugida ee gobolkii woqooyi galbeed.

Gaar dil gartiisana siiyee wuxuu Axmed Aadan ahaa dadka lagu tirin karo inuu hawshii adeerkii u igamaday ka soo baxayey marka la barbardhigo shakhsiyaadka haybta la wadaagey ama xidid la ahaa habaarqabe ina Siyaad ee laga dhigay waxaanay aheyn kuna danbeeyey duuliyihii qarankoo biyo dhaaminaya .Waxaana dadkaa ka mid ah:

- Maslax Ina Siyaad (Ilaalada Gaarka )
- Nuur Bidaar (laantii Socdaalka)
- Buule (gobolkii woqooyi galbeed)
- Canjeex (Ilaalada gaarka ,qaybta taangiyada)
- Cabdicasiis Cali Bare (Qaybtii $26^{aad}$)
- Idaajaa (aqoonyahankii taariikhda iyo suugaanta)
- Gaani (Qaybtii $26^{aad}$)
- Cabdiraxmaan Guulwade (taliyaha ciidamada guulwadayaasha)-Sodog loo ahaa.
- Morgan (Qaybtii $26^{aad}$) –Sodog loo ahaa
- Maxamed Warsame (Ciidamada Xooggii dalka)
- Cabdilaahi Shire Warsame (koofiyad casta )
- Cismaan Caano geel (CID)
- Axmed Sh. (Safiirkii Nairobi fadhiyey)
- Cabdi Shire Warsame ( Qunsulkii Nairobi u fadhiyey)
- Sureer Abshir Muuse Haamaan (Qunsulkii London u fadhiyey)
- Axmed Saleebaan Dafle (Taliyaha Nabad Sugida)-Sodog loo ahaa.
- Yuusuf Dheere (Taliyaha maxkamada wareegta 1982-1986)
  (Taliyaha maxkamada wareegta 1987-kalayaacii faqashta)
- C/laahi Dibbood (Taliyaha maxkamada wareegta 1986-1987)
- Daahir Iid - Taliyihii Ciidamada Hangashta Hargeysa

Gudidaa baadhista ee arintaasi waxay muddo ku sugnaayeen Hargeysa.Waxaanay xog ogaal u noqdeen sidii ay guusha ku hanatey SNM ayna u hanansiisay dawladii habaarqabe dhabarjab weyn.Markii ay ku noqdeen Xamar waxay gudbiyeen warbixin murugo leh si fiicana daaha uga rogtay galdaloolada maamul ee dhagarqabe Gaani.

Waxay warbixintani si laxaad leh u taageertay warbixintii laga gubdiyey hawlgalkii aqoonyahanadii UFO.Waxaanay tustay maamulkii Ina Siyaad inuu u baahan yahay ku soo badinta taageerayaashiisa degaanadan.Sidaa darteed ayey warbixintaa ay ka qoreen gudidaasi guuldaradaa dawladii xilligaa iyo guusha la taaban karo ee ay gaadheen ururka SNM oon mar danbe noqonayn afar injir leh keentay in isbadal lagu sameeyo maamulkii goboladii woqooyi ee xilligaa oo ugu danbeyna u dhacdey sidan:

-Maamulkii gobolka: Buule (ilaa 1983 dabayaaqadiisii)
Markii uu mudo ku jiray ciidamada ayaa loo diray Wadanka Kuuba.waxaana tababaraayshiisii ka mid ahaa Siciid Cali Odowaa. Siciid Cali Odowaa oo ahaa tababarihii Buule ayaan helin ama aan isagu marna gaadhin darajadaa uu Buule gaadhay iyo tu u dhawna. Buule wuxuu yimid magaalada Gabiley isagoo xidigle ah 1979 kii, loona badalay inuu noqdo gudoomiyihii gobolkii woqooyi galbeed dabayaaqadii 1983 kii isagoo gaashaanle dhexe ah.

-Taliyaha Qaybta 26aad : Morgan oo maalmahaa lagu badalay Gaani

-Taliyaha Nabad Sugida : Axmed Aadan

-Taliye ku xigeenka Nabad Sugida : Daa’uud

-Taliyaha ciidanka booliska: Kabtan Xidhe

-Taliyaha hangash (dhabar jabinta): Daahir Iid

**-** Godka oo ah xabsiga NSS-ta : Aadan “Cirday”

-Maxkamada Wareegta : Yuusuf Dheere

Waxaa isbadalkaa la sameeyey ka mid ahaa in Axmed Aadan loo soo magacaabo taliyaha nabad sugida ka dib markay sugnaatay in aanu si xilkasnimo ah u wadin hogaamiyaha laysku haleeyey ee Gaani .Waxay Gaani arintiisu noqotay inuu xoog ku muquuniyo xooggaga ka soo horjeeda,adeegsadana dil, xadhig, qarameynta hantida gaarka ee dadweynaha, iwm. Tani waxay baraarujin u noqotay dadweynihii una muujisay in taageerada SNM ay tahay hilinka kaliya ee lagaga gudbi karo hagardaamadan joogtada ah.

Madaxwenihii habaarqabe wuxuu u sheegay inankiisa Gaani inuu u baahan yahay taageerada Axmed Aadan lana shaqeeyo.Hase yeeshee mudo ka dib waxaa aad u adkaatey wada shaqeynta Axmed Aadan iyo Gaani .Tani oo keensatey muddo gaaban ka dib in lagu badalo Gaani wiilka uu sodoga u ahaa Ina Siyaad ee lagu magacaabo dadqalkii Hargeysa Morgan (Butcher of Hargeysa).

Axmed Aadan waxaa hagayey oo saldhig u aheyd falalka uu filinayo maahmaahda “Waraashe wabaashe” oo noqonaysa haddii si fudud loo tilmaamo “Raac oo lumi”. Halka uu ururkii SNM-tuna rogaalcelin ugu deeqayeen maansadii Salaan Carabey (Ihun) ee laheyd :

Dabkaad hurin habeen iyo dharaar halacyadaad oogi
Halna kuma xereyside dadkaad ku hawaraysaaye

Halka uu abwaankeenii caanka ahaa ee Faarax Nuur (Ihun) si faahfaahsan ugu dhigay maansadan:

- Qadhabo iyo lucaaf iyo xeelad, laysku qabanaayo
- Quruf oodan shabaq laysu qubay, qoolad iyo xeelad
- Qosol been ah qoor wada qayaxan, qiiq aan garanaayo
- Qoodaan afkii laga qabilay, qarafna hooseeyo
- Doqonbaa halkii lagu qatali, qoorta soo dhigane
- Ma anaa mindiyo lay qarshaa, laygu qali doono

Do not bite at the bait of pleasure 'til you know there is no hook beneath it.
Thomas Jefferson
(1743 – 1826)

Wareysiyo ay bahda Mareegta Farshaxan la yeelatay dad fara badan oo aqoon u lahaa Axmed Aadan waxay aad iskugu raaceen tilmaamo badan oo uu lahaa.Waxaanu isku daynay inaanu si kooban u soo qorno tilmaamahaa ay ka midoobeen oo ku sheegay Axmed Aadan inuu :

-ahaa nin cajiib ah oo dadkii hantiyey.
-odayadii ka dhigay adoomo.
-dhalinyaradii u geystay dhib badan oo dhaqanguur badan laga dhaxlay.
-adkayeeyey xidhiidhkii gudaha ee ururka SNM iyo dadweynaha.

Markaa ka dib waxaan u gudogalnay inaan ogaano siday ugu suurtogashay inuu noqon karo mid ku soocan tilmaamahaa. Waxaana bahda Mareegta Farshaxan u suurtogashay inay soo ururiyaan dhacdooyin badan iyo taageero badan oo uu helay.Si kooban waxyaalaha u suurtogaliyey Axmed Aadan inuu fulin karo hawlahaa waxaa ka mid ahaa:

-Maamulkii dawladaa oo gacanta ka galiyey dhaqaale badan.
-Waxyaabihii dalka laga mamnuucay oo loo ogolaadey sidaa Jaadka ama sameyn xarumo Jaad (Mijilisyo).
-Maalgalinta waxyaalaha dhalinyarada mashquulin kara.
-Maamulkii hay’adaha ilaa gobolka oo isaga si dadban maman u hoos yimid .

Waxaa kaloo Axmed Aadan garabsiinayey adeegsiga sharciga **NSS**-ta ee **XEER 14**[aad] oo soo baxay **February 15,1970** [kii]**.**Hadeynu in yar xusno Xeerka 14[aad], inqilaabkii askartii 1961[kii] markii maxkamadii ruwaayada aheyd la hor keenay ayuu maamulkii jiray raadiyey siduu dil ugu xukumi lahaa askartaa aqoonyahanada ahaa. Dil ku xukunku waa raadinta halka ugu sareysa ciqaabta (ultimate punishment) qof loo tirinayo inuu danbi galay, iyadoo in lagu cadeeyaa aaanay muhiim aheyn. Ina Siyaad Barre oo arintaa goobjoog u ahaa ayaa inqilaabkii 1969[kii] waxay maamulkiisii tuhmeen dhawr qof oo inqililaabka la fuliyey. Si kuwaasi loo ciqaabo ayaa la aasaasy xeerkan lana hirgaliyey. kani oo awood u siinayey ciidamada nabad sugidu inay baadhaan qof kasta iyo guri kastaba, isla markaana u banneeyay in ay la wareegaan hantida cid kasta oo lagu tuhmo in ay kacaan diid tahay iyadoon loo baahneyn in la cadeeyo. Waxaa hawsha horumarinta iyo hawlgalida xeerkaa gacan weyn ka gaystay loona tiriyaa dhagarqabe Axmed Saleebaan Dafle.Dadka ay xidhaan hay`adaha nabadgalyadu xaq umay lahayn in loo sheego dambigooda, fursadna looma siin jirin in ay la tashadaan qareen difaaca (looyar). Ka dibna waxaa xukun saari jiray maxkamadii wareegtay oo uu hogaaminayey dhiigyacabkii Maxammed Geelle Yuusuf , halka uu goboladii woqooyi uga wakiil ahaa axmaqii Yuusuf Dheere.

Markay arini halkaa mareyso ayaa ururkii SNM oo hawshana si talaabo talaabo ah ula socday, u hawlgalay inuu la yimaado falcelin ku aadan hawlgalkaa Axmed Aadan.Tani waxay ka fursan wayday in dib loo eego dastuurkii SNM oo si cad uga soo horjeeday falalka argagixisnimada. Si guud ayaa layskula gartay inay lagama maarmaan tahay wax ka qabashada falalka Axmed Aadan.Waxaana loo saarey koox uu hogaaminayey geesigii ku caano maalay magaca mujaahid Bashiir .

Bashiir wuxuu ahaa nin xoog leh, aadna u kulul markay noqoto hawlaha halganka,had iyo jeerna u heelan wax qabasho.Waxaa aad loogu tilmaansanaa inuu ka caaganaa iskhilaafka.Wuxuu inta badan ku jiray gudaha dalkii Soomaaliya,halgankana kaga jiray oo joogi jiray magaalada Hargeysa.Waxaan marnaba xubnihii SNM aanay ilaawayn halheyskii uu gole walba uga dhigi jiray gundhig loo noqdo laguna caanomaalo ee ahaa “waar beerta labada dibi ee qodaya mid baa qoorta hoos u dhiga ,culayskuna mid uun buu ku dhacaa .Tani way isku qoor go’dayee hawshani inagay ina saaran tahayee hawlgala”.

Bashiir wuxuu halganka markaa ku jiray muddo kooban, waxqabadkiisuse wuxuu midho dhaafiyey in badan.Qoraal u gaar ah ayeynu ku soo qaadan doonaa taariikh nololeedkiisa oo faahfaahsan insha Allah.

Xilligaa waxaa gudoomiyanimada SNM sii hayey mujaahid Ibraahin Maygaag Samater, iyadoo uu gudoomiyihii ururku hawlo gaar ah ugu maqnaa cariga Ingiriiska.Waxaa ahaa wasiirka gaashaandhiga mujaahid Aadan Shiine(Ihun), aadna ugu dhawaa xidhiidhka dhalinyarada

Hawshaa oo fulinteeda, taladeedada, qorshaheeda, iwm ay u dhamaayeen dhaqdhaqaaqii SNM gudo iyo dibadba ayaa dhinaca dhaqaalaha waxaa hanoqaadey dadkii deganaa

dhulalka carabaha siiba koox la baxdey magaca "Gurmadka Xaydan" oo had iyo jeer heegan u ahayd maalgalinta hawlaha degdega ah.

Wadahadal dheer iyo falanqayn waxaa laysku raacay in Axmed Aadan meesha laga saaro.Waxaana loo hawlgalay fulinta hawshaa iyadoo loo xilsaaray Mujaahid Bashiir oo kaalmaystay laba kale oo mujaahid.Maadaama uu aad u joogay magaalada Hargeysa, xidhiidh horena la lahaa wadayaasha tagsiyada Hargeysa, waxaa u fududaatey ogaanshaha shaqo maalmeedka iyo dhaqdhaqaaqa Axmed Aadan.

Waxaanu ka haynaa xubin sare oo nabad sugida ahaa inuu Axmed Aadan habeenkii ay caado u ahayd inuu tago dukaan ay haysatey gabadh la odhan jiray Degmo oo iibin jirtay caanaha. Halkaa ayuu si joogta ah u u tagi jirey arrimo isaga u gaar ah awgeed. Dukaankaasi wuxuu ku yaalay xaafada Gacan Libaax, wuxuuna ku dhawaa tiyatarka iyo guriga hidaha iyo dhaqanka.

Markuu soodhku dhaashaday     markuu dhiigu shalaxbeelay
Markuu qumuca dhiilada sidaa     laba dhaclaynaayay
Sida dhool gu' oo da'ay     markuu dhibicu heehaabay
Dhab markii dagaal loo galiyo     dhiidhi dirirreedka
Dhudi yaa lahaayeey markii     lagu dhawaaqaayey
Dharaartaa ninkii maali jiray     dhici xaqiisiiye

Cabdiraxmaan Cawl "Baqdaadi"

Waxaa habeen Sabti soo galayso ayna bisha Diisambar ku beegnayd 6,gu'gii 1986$^{kii}$ ayuu Axmed Aadan tagey dukaankii uu tagi jiray iyadooy la socdaan saaxiibadiisii uu ku kalsoonaa, godobfalkana ay ku walaaloobeen, ee Daa'uud iyo Degmolaqas.Waxaana goobtaa ku diyaar ahaa mujaahidiintii u badheedhay inay ummada Soomaaliland ka dul qaadaan daadxoorta.

Waxaa si fudud oo cilmiyeysan ugu suurtogashay inay fuliyaan hawlgalkoodii aanay si fudud uga libdhaan meeshaa. Waxaa habeenkaa halkaa ku qudh baxey Axmed Aadan iyo intii la socotay.

Waxaa diyaargaroow la galiyey dhamaan hay'adihii nabadglayada ooy ku jiraan ciidamadii qaranku. Waxaa magaalada iyo degaankii woqooyi oo dhan istaagay dhaqdhaqaaqii baabuurta iyo dadka. Waxaa bilaabmay aargoosi aan loo meel dayin.

Waxay tani ku noqtay Jug weyn oo ku biirtay dhirbaaxooyinkii hore ay ururka SNM ugu gaysteen dawladii ina Siyaad. Waxaanay guul iyo damaashaad u noqotay halyeyadii SNM.

**Falcelintii dawlada:**
Markii dhacdadani dhacday ayey dawladii u hawlgashaey aargoosi aan loo aabo yeelin.Waxaa dhamaan goboladii woqooyi la xayiray dhaqdhaqaaqii dadka iyo baabuurta (Bandoo-curfew). Waxaa la xidhxidhay dada badan waxaanse halkan ku xusaynaa Mujaahid Sulub Jaamac Aw Cismaan(Ihun) oo arintaa lo xidhay laguna xukumay dil. Waxaa loo gaystay jidh dil aad iyo aad fooxun.Waxaase guul aheyd in muddo aad u gaaban ka dib uu si tilmaan gaar ah laheyd uga baxay jeelka Magaalada Hargeysa. bishii Oktoober 2,1988 maalin kahmiis ah, ayuu Mujaahid Sulub ku geeriyooday magaalada Hargeysa,ee wadanka Somlailand.

Xadhigu wuu tiro beelay ,waxaanay warisay hay'sa Africa Watch sedan:

**C/Raxmaan Maxammed Jaamac,** gacansade ahaa oo AFRICA WATCH ku waraysatay **Djibouti** bishii siddeedaad, **August 3,1989**. *Markii la dilay **Axmed Aadan** (Taliyihii **NSS**-ta ee gobolka) bishii laba iyo tobnaad, **December 1986** walaalkay **Rashiid** ayaa la xidhay saddex bilood ayuu ku jiray xabsiga **Mandheera**, Markii dambe waxa lagu sii daayay fadliga dad **NSS**-ta ahaa oo aan bartay, dalkana degdeg ayuu uga baxay.*

## Dhibtii uu gaystay:
Waxaa warbixinaha kala duwan ee ku soo biiray qolka kaydka ee mareegta Farshaxan ay sugayaan inuu ahaa nin aad u dhib badan.Hagardaamadiisu waxay saamayn ku yeetay guri kasta, una taabatey si toos ah iyo si dadbanba.Hase yeeshee waxaanu ka soo qaadeynaa dhawr ka mid ah dhacdooyinkaasi:
Dadka uu dhib badan soo gaadhsiiyey Axmed waxaan tusaale u soo qaadan karnaa dhacdadan ay inoo soo werisay hay'ada Africa Watch oo u qornayd sidan:**Khadra Muxumed Cabdi** waa hooyo dhashay laba wiil oo yar-yar leh, waxa aanay maamule hore ka ahayd **Oriental Hotel**-ka ku yaalla Hargaysa:Waxa ay tidhi: "**Axmed Aadan**, oo ahaa madax **NSS**-ta iyo ku xigeenkiisa **Daa'uud** ayaa caadaystay inay I kadeedaan. Waxa ay ii sheegeen in kiiskayga ay laabi doonaan haddii aan siiyo midkoodba **Laba boqol iyo todobaatan** (**270,000**) Kun oo shilin. Waxa aan kaga jawaabay, in qoyskayagu aanu haysan wax intaa gaadha. Caga juglayntii way iska sii wateen iyaga oo igu haddidi jiray inay I xidhi doonaan ganacsigayagana bur-burin doonaan. **Hotel**-ka askartii waxay iman jireen gurigayaga habeenkii saacadaha dambe iyaga oo ku celcelinaya isla haddidaadi. Kama dambaysta waxa aan go'aansaday in aan baxsado, si qarsoodi ah ayaanan u tagay **Sacuudi Carabiya**." Horraantii **1984**-kii markii ay maqnayd hal sano ayay **Khadra** hooyadeed bukootay, sidaas awgeed ayaa ay ugu soo noqotay Hargeysa. Waxa ay tidhi, "Markii aan joogay lix maalmood oo kali ah ayaa la I xidhay. Waana la I waraystay. Xageed ku maqnayd?. Waxa aan u sheegay in aan tagay **Sacuudiga** oo an ku soo guursaday nin. La ima sii dayn ilaa qoyskayagu ay siiyeen **Kun** (**1000**) **dollar** iyo **Lix boqol kun** (**600,000**) oo shilin soomaali ah Raggii kiiskayga ka masuul ka ahaa (**Axmed Aadan** iyo **kabtan "Hidhe"** oo booliska ahaa, waa la isii daayay waxa aanan ku noqday **Sacuudigii** lix (**6**) bilood kadib. Saddex (**3**) sano oo dambe ayaan maqnaa.

# Wacaal iyo warcelin:

Bahda Mareegta Farshaxan waxay la wadaagtay aqoonyahanka ummada Soomaliland waydiimo ku saabsan dhacdadan.Waydiimuhu waxay u dhignaayeen sidan:

Dilkii Axmed Aadan:-Halkeed joogtay Disambar6,1986? Sideed ku maqashay dhacdadaaa? Dareenkaagu siduu ahaa maalintaa? Sideed u dhigi laheyd markaad ka waranto guulihii uga soo hoyday SNM dhacdadaa iyo guuldaradii ay kala kulantay xukuumadii xilligaasi?

Waxaanu si hagar la'aaneed uga helnay aqoonyahanadaa warcelintii, hase yeeshee waxaanu la wadaagaynaa bulshada qaar ka mid ah warcelinahaa noqday xad dhaafka.Annagoo kuwa kalena u soo gudbin doona siyaabo kala duduwan.

## Drs.Amina H. Adan:

Waxaan joogay maalintaa magaalada Rooma ee cariga Talyaaniga. Waxaan u joogay cilmi baadhis aan samaynayey.Waxaa maalintaa ii suurtogashay in aan arko wargeys ka mid ah wargeysyada dalkaa oo si faahfaahsan u qoray dilkaa. Inkastoo ay yareyd aqoontayda afka Talyaanigu, hddana waxaan kaalmaystay dad kale oo si faahfaahsan iigu balbalaadhiyey dhigaalka iyo fariintii uu xanbaarsanaa qoraalkaasi.

Wuxuu qoraalkaasi sheegay in taliyihii ciidamada nabad sugida ee gobolkii woqooyi la dilay.Waxaanu isagoo sii wada sheegay in ay dileen niman ku hilaabnaa go'yaal shaal ah sitayna qori dabalaab ah. Waxaan si fudud ugu suurtogashay nimankaa inaan la qaban.Waxaa aad looga dareemay farxad iyo raynrayn bulshada degaankaa, halka ay dawladii arintani ku noqotay dhabarjab weyn.

Waxaa kaloo qorshahan nidaamsan ee dilka ahi muujisay kartida iyo awooda uu leeyahay ururkii dhaqdhaqaaqa wadaniga Soomaaliyeed ee SNM. Tani oo had iyo jeer dhinaca dawladi laga muujin jiray inaanay jirin, laheyna awood lagula gorgortamo oo keensanaysa in la horfadhiisto .Wadamada dunida ayaa in badan kula taliyey hogaankii dawlada inay horfadhiistaan ururka SNM oo waxay tabanayaan isla meel dhigaan.

## Xasan Maxamed Cabdi:

1-Axmed Aadan waxa markii ugu horeysay uu Hargeysa ka Hawlgalay isaga oo ka mid ah Baadhayaashii kiiskii (Ufo) 1982 ka dib waxa ugu xigtay kiiskii ardayda oo isna uu ka mid ahaa baadhayashii halkaas oo uu ku dalacay loo soo magacabay na Taliyaha Nabad Sugida Gobolka Waqooyi Galbeed ka dib si qoto dheer ayuu u dhex galay Mujtamaca xidhiidho badan la yeeshay waxa uu xaafadaha dhigtey cid u soo ogaata magaalada cid kasta ku soo korodha ama waxa jira waxa uu isticmaali jiray tabo badan oo ay ka mid tahay dadka xaq darada lagu soo xidho ayuu xafiikiisa ugu yeedhi jirey marka inta uu waraysto ayuu ku odhan jirey xaqdaray kugu soo xidheen ee xor baad

tahay ama nin basaasiintiisa ka mid ah inta uu soo hor fadhiisiyo ayuu odhan jirey waa kan ee ku cadee wixii aad sheegaysay markaas ayuu yidhaa way ku masabideen ee xor baad tahay taasna sumcad ayuu dadki xaqdarada ku xidhnaa kaga helay ay yidhadaan waa nin fiican waxa kale oo jirtey qorshe kale oo uu rabay in uu sameysto ciidamo Isaaq sooc ah oo uu ka horgeeyo Dagaal yahan ka Snm .
taas ayaa soo jiidatay Unigii Sahanka Dagaal yahanka Snm oo ay ka mid ahayen Muj Bashiir Allah yarxami Muj Nuur Muhindis Muj Osman Awrliqe nin ka Tagsiilaha ah ina Oomar waxa uu garnayay Axmed aadan Goobta uu caanaha ka cabi jirey iyo wakhtiga uu iman jireyba oo ku taalay sii jeedka Tiyaatarka ama ka soo horjeedka Gurigii hidaha iyo dhaqanka waxa aan xasuusta Gabadha meesha lahayd in la odhan jirey Degmo markaa Habeenkaa hawlgalka la fulinayay Gaadhi kale ayuu nin ka soo kaxaysatey markaa inta uu gaadhigii Axmed Aadan ku dhaweeyay ayuu u dhaafay saaxiibadii in ay waajibkooda gudaan Allena ku Guullee
Waxa la kharijiyay Axmed Adan Ninkii ku xigay ee Daa'uud iyo Degma laqas (oo uu garanayo Qof kasta oo warqad ama cajalad dibada u direy oo ah ninkii akhriyi jirey waraaqaha ama dhegaysan jirey cajaladaha ).
War Subaxeedkii Hargeysa laga direy ee Taliskii Muqdisho loogu Gaadhsiiyay Dilkii Axmed Aadan waxa lagu sheegay in Ogaaden ahi uu ka danbeyay Dilkaas waa warkii laga helay Warqabadka Ethiopiankaa ee Snm loo gudbiyay.

## **Jaamac Muuse Jaamac**:

"Habeenkaa waxaan joogay magaalada Hargeysa. Waxaanan ku soo caweeyey guri ku yaalay Goljanno .Xilli danbe ayaan u soo baqoolay gurigaygii. Maan ogayn waxa magaalada ka dhacay laakiin anoo soo lugaynaya dhakhtarka TB-da agtiisa, oo dooxaba ku soo dhow ayay igaga soo kaceen askar badan oo ku dhuumanaysay albaabka hoose ee maxkamadda. Waxaanu tiro aheyn saddx qof. Askartii Way na fadhiisiyeen, madaxana gacmaha noo saareen. Waxay na waydiiyeen inaanu wax ka ogayn falka dhacay. Waxaanu si fiican ugu celinay inaananu waxba ka ogayn oo run naga ahayd markaa Laba saacadood ka dib ayay intay dad kale noo keeneen oo dariiqyada laga soo ururiyey, na fadhiisiyeen ardaaga (ganjeelka albaaabka hore) dhakhtarka TB-da. Dhaxan aad u fara badan baa dhacaysay. Waxay na sii daayeen 1^dii habennimo iyagoon noo sheegin waxa dhacay, dadkayagii la qabqabtayna maanu wada hadli karayn. Subixii danbe ayaan ogaaday waxa dhacay. Dadka badankiisa waxay ku noqotay lama filaan. Qorshe aad u habaysan oo aanay marna maamulkii arxanka darnaa ee ka talinayay gobolku filayn oo fallaadh ku noqdey xanuun badan ku keenay ayuu ahaa. Hargeysa maalintaa waxa ka bilaabmay waji nololeed oo cusub: bandoo, nolol adag, waraaq dhaqdhaqaaq oo xitaa ardeydii jaamacadda Xamar ku noqonaysay ku adkaatay inay dib u socdaalaan si ay waxbaashadoodii u sii wataan"

**Cali Cumar Xasan :**

Waxan joogay magaalada la yidhaa Geedbalaadh markii aan dareemay inay wax dhaceen hase yeeshee aanay weli xaajadu kala cadaan. Waxa taliskii Siyaad Bare ee gacan ku dhiiglaha ahaa uu beryahaa ( 1982-1991-kii) baqdin darteed askartiisii milatariga ahayd dhex dejiyay, magaalooyin badan oo xadka ku teedsan, si ay dadku gabaad ugu noqdaan oo ay S.N.M-tu weerarka dadkeeda uga tudho, taasi waxay keentay inaanay badanaa waxba u qarsoonaan askar ku sheegtaasi, oo wax kasta oo ku soo kordhaba ama dhaqdhaqaaq kasta oo ay samaynayaan iyada oonad cidna waydiin aad markaaba arkayso.

Hadaba habeen-nimo saq badh ah ayay ahayd markii askartii maamulkii Siyaad Bare godka biyo ugu galeen ee ay jiif iyo joogba diideen ee ay kolba dhan u yaaceen ee ay isla dayaameen, ee weliba si ay malaha miciin uga dhigtaan xiinka baabuurta dagaalka ee loo yaqaan Bee-beega iyo rasaas badan isku dareen ee ay faqash-faqashtu ka idlaatay, dadka oo ku bartay is waalwaalkaa iyo gabgabtaa madhan ayaa markiiba gartay inay wax dhaceen, waxase la is waydiiyay ma " S-tii ( S.N.M )" baa soo dhawaatay oo xadka timid? mise " S-tii ( S.N.M ) baa fal gudaha ka fulisay? marka labadaasi dhacaan ayaa looga bartay askartii faqashtu inay qabqabta iyo aabahay goblanta badiyaan.

Aroortii markii waagu baryay ee la soo kaakacay ayay ahayd Kolkii aan maqlay in Axmad Aadan ( taliyahii NSS) la dilay, waxa warkaa noo sheegay nin gaadhi ( Bas-caanoole ah) watay oo askartii u diideen inuu Hargaysa u baxo oo uu caanaha geeyo! markuu waydiiyay sabata loogu diiday ayaa ay qaar ka mid ah askar faqashtii ku yidhaahdeen nin sarkaal ah oo NSS-ta gobolka haystay ayaa la dilay.

Dareenkaygu waxa uu ahaa mid badhax ah:
Waa marka 1-aad-e, waan ku farxay oo xuub ayaa iga dilaacay in nin jago sare oo saamayn wayn ku lahayd jaangooynta hagardaamada dadka reer Somaliland ee maalin kasta raaba raabada loo daldalayo ee loo dooxayo dhegta dhiiga loo daro, oo loogu aaro mid ka mid ah intii hal-door uun aan lahayn ee la xasuuqay, tusaale ahaan mujaahidiidntii 1984-kii dagaalkii buuraha ee S.N.M iyo faqashta dhex maray, ee ay faqashtu maydkii mujaahidiinta soo guratay ee ay wadhay wadada Gabilay iyo Wajaale ama Gabilay iyo Arabsiyo u dhaxaysa dhinacyadeeda, si ay dadka ugu bah disho, iyada oo weliba arxan darida iyo dadnimo xumada faqashtu ay diiday inay xataa dadku maydka wiilashooda aastaan, maydkaasoo markii danbe bahalku ka dhergay oo dufankoodii wali carada ka sii qoyanaa.

Ama godob la inaga galay ma yarayne loogu aaro warac kale oo ka mid ah kumanaan-kii kale ee madhaafaanka ahaa ee lagala baxay guryahooda ee ooryahoodii, caruurtodii, waalidkoodii iyo dadkoodii oo arkaya xabada lagu jarjaray ee kuwii ay ifka kaga ka tageen-na nolosha ku caarcaareen ee ay ilaa maalintadan maanta ah silcayaan, ama in loogu aaro nin kale oo ka mid ah ragii wax-garadka iyo wax-galka ahaa ee isaga oon waxba galabsan oo dantooda ku foogan la iska qabsanayay ee aan tan iyo maanta lahayn jaan iyo cidhib meel ay dhigeen. Waxa ninkan iyo kuwii kale ee jagooyinka sar sare ka haystay dawlad ku sheegtii Siyaad Bare ee ka hawlagayay dhulka Somaliland intii u

dhaxaysay 1981-1991 kii yihiin dadkii laayay in ka badan 70,000 oo qof oo waayeel, hooyooyin, caruur, iyo wax-garada biri-ma-gaydo wada ahaa, aan waxba galabsan ee lagu dilayay keliya inay la hayb yihiin, mujaahidiintii xaq u dirirka ahayd ee S.N.M.

Dareenka qofnimo ee hadaba waayahaa (Dil, kufsi, dhaca dadka loo gaysanyo), la-laba-lagdoonayay xiligaasi waxa uu gar iyo dawba u lahaa inuu fooladayn iyo damaashaad uu isku daray ku soo dhaweeyo falkaasi dilka ahaa iyo mid kasta oo kale oo aad cadawga adba ku qalaya aad adna isaga ku wareemaysid, waana wax dadku ka siman yahay in ninka dhiigaaga inuu daadiyo jecel aad adna kiisa jamato, sidaa darteed aad baanan ugu diirsaday falkaa sidii uu qof kasta oo inaga mid ahiba ugu farxay ee uu ugu hanbalyeeyay geesiyadii S.N.M ee fuliyay.

- waa marka labaade. Waan ka naxay oon xasuustay axmaqnimadii iyo cadawnimadii jaahiliga ahayd ee taliskii hororka ahaa lagu yaqaanay, oo waxa i hor timid inta qof aan waxba galabsan oo reer Somaliland ah, ee uu taliskii makasta ahaa ee Siyaad Bare uu u uusaasi doona dhacdadaa darteed! Isaga oo ku dhaqaaqay markiiba oo dad badan arintaa darteed u xabaalay, labadaa dareenba waa ay igu ladhmeen warkaa aan maqlay ka dib.

Sidan ayaan u dhigi lahaa ee ila eeg adna:
- Horta aan in yar ka yara horaysiiyo e, waxa markii S.N.M abuurantayba iska cadayd in taliskii Milatariga ahaa ee Siyaad Bare uu waa cusub oo hor lehi u baryay, oo S.N.M ay tahay/ ahayd dhaqdhaqaaq ka dhashay dareen ku salaysan tabasho guun ah iyo gocosha raagtay, oo weliba dadka ka danbeeyaana ay yihiin dad hankoodu ka wayn yahay kursi la iska riixdo ama jeeb la isku buuxiyo, sidaas darteed waa ay muuqatay in dagaalka ay u hub qaateen noqonayo mid lagu hooban doono oo riiq xun ku reebi doona dawlad ku sheegtii Siyaad Bare ee xiligaa, taasoo S.N.M markiiba hawlagladii iyo qorshayaashii ay ku balaysintay halgankeedu ay noqdeen qaar xaqiijiyay malahii laga qabay.

Ma ay yarayn oo lama tirin karo inta hawlgal ee ay fulisay ama dagaal ee ay 10-kii gu ee ay hubka siday S.N.M -tu la gashay taliskii Siyaad Bare ee ay libin-tana iyadu la hoyatay, hadiise aan mid iyo laba ka xusno S.N.M-tu hawlgalada ay gudaha ka fulin jirtay waxa ka mid ahaa kuwii ugu mudnaa, qorshahii sida xeesha-dheer leh loo soo agaasimay ee sida caaqiibada lehna loo dhamaystiray, ee lagu dilay taliyahii NSS-ta ( Axmad Aadan iyo askartiisa qaar ka mid ah). Hawlgalada jaadkan oo kale ahaa oo tiradoodu ay kobnayd waxay ahaayeen qaar la jaangooyo kaliya marka xaalado adag oo Xiniinyo-taabasho ah oo aad u muhiim ahi ay S.N.M ama dadkeeda la soo darsaan, waxana ay ahaayeen qaar badheedh, oo si qoto dheer loo lafo-guro, oo gabagabadana naftood hurayaal naqwa ah badka la soo dhigo.

Dilka Axmad Aadan ma ahayn mid la iska fuliyay uun ee waxa uu lahaa tix-raaciisa ka duway isaga saraakiishii kale ee badnayd, waxana uu u qaadan waa iyo anfariir ku riday taliskii Siyaad Bare, oo uu ku noqday boqna go' uu kasoo waaqsan wayay, niyad jab iyo walaahow badana ku riday talisyadii iyo maamuladii dhiigyacabka ahaa ee ka jiray Somaliland xiligaas, oo cirka iyo dhulku qaadi waayay. Waxa guusha falkaasi ka dib meesha iyaguna Ka baxay qorshayaal qabyo ahaa iyo dabino badan oo hadimo-qoolis ah

oo dhaawac wayn u gaysanayay dadkii gudaha joogay ee reer Somaliland, saamayn badana malaha kuba yeelan karayay halgankii mujaahidiinta S.N.M.

Waxa dhab ahaantii uu dhacdadaasi ku waayay maamulkii Siyaad Bare nin ka mid ah kuwii ugu miisaanka waynaa ee ay u soo xilsaarto dabargooynta dadka Isaaqa ah. Gari laba ruux kama wada qoslisee waxa-se guul iyo gumaro aan cadad iyo tiro lahayn halkaas ay hadana sidii looga bartay uga soo hoyatay
halgamayaashii S.N.M. Hirgalista falkaas waxa kale oo uu muujiyay oo cadayn aan la qarin karin uu ka dhigay inay S.N.M. leedahay xirfad durugsan, xeel dheer iyo xoog cudud adag ku fadhiya oo ay dalka gudahiisa qorshaha ay doonaan ka fushan karaan iyaga oon waxba iskaga tirinayn maamul ku sheegii xiligaa ka jiray waxii la isku odhan jiray Soomaaliya.

Sida aad ka war hayso waxa kale oo jiray hawlgalo aad u qiimo badnaa oo la mid ahaa kan dusha aan kaga yar sheekeeyay, sidii kii Cabdilaahi Askar lagula baxay, kii dhakhtarada faransiiska ahaa ( msf ) lagu afduubay iyo kii kale ee Jeelka Mandheera lagu jabiyay, dhacdooyinkaasoo sida qaalibka ah saamaynta ay ku yeeshaan bahda iyo baraqa cadawga ama garabka lagu fuliyaa ay aad uga  wayn tahay khasaaraha ay markaa goobta lagu fulinayo u gaystaan, taasi oo hubaashii ahayd ta taliskii Siyaad Bare ka soo kaban waayay, dhan kastaba ee dhegtooduna ku xumaatay gudo iyo dibadba, waxana ay ka mid tahay sababihii keenay inay askartii Siyaad Bare waxba iska caabiye kari waayeen, oo sidaan wada ognahay ay taa bedelkeedana ku ciil wasiisiye jireen dadka shacabka ah marka dhirbaaxooyin kululi kaga dhacaan dhanka S..M-taba!.

Ugu danbaystii falkaa lagu dilay sarkaalka sare ee NSS-ta ah iyo kuwii jaadkiisaa ahaaba waxay noqdeen qaar kala saara Tayada labada ciidan ee is hayay, waa S.N.M-ta iyo Faqahtiiye.

## Maxamed Baashe Xaaji Xasan:

Waxa aannu ahayn “dhiillo ku nool”! Dhegahayagu waxa ay u furnaayeen wararka xambaarsan meel guutooyin guluf galaabixiyeen oo “waran dhul galay iyo Caliyo la laayey oo birta laga aslay”!

Seben waliba xeeshiiye
Mar hadday silloonaato
Sumuc talada loo dhiibye
Sida sida sidaas weeye
Si la yeeli jirey weeye

Waxa uu ahaa sebaan lagu foogganaa halgan hubaysan iyo waayo dhimasho loo qoordiidnaa.

Ha iska dhiman sidii neef

Dhudhun kaa horjeedaa
Ku dhirbaaxi maayee
Horta dhiig ku faraxalo!

Yaan lagaaga soo dhicin
Dhinacaan is bixin katin
Dhacadiid iska ogow
Dhagartana is weheshada!

Intaas iyo boqollaal kale oo hal-kudhigeed ayaa lagu hubaysnaa. “Inaad wax dishid ama lagu dilo” wax kale saddex kuma ahayn.

Sidaas daraadeed maalintii uu warku na soo gaadhey waxa ay ahayd maalin ka sheeggan maalmaha. In suuqa Hargeysa lagu dooxay nin sarkaal ah oo weliba madax ka ah hay’adihii cadaadinta iyo cabbudhinta dadku, waxa ay ahayd guul lagu naalloodo iyo war naga iibsamaya gudo iyo dibadba.

Fiidnimadii 6th of December 1986, habeenkaas la dilay Axmed Aadan oo madax ka ahaa Nabad Sugidda  ee Hargeysa, waxa aan anigu ku sugnaa qof ahaan ceelka Addis Ababa. Waxa aan Ka shaqaynayey Idaacaddii wareegi jirtey ee Radyow Halgan; Codkii Midaysnaa ee Xoogaggii Mucaaridka Soomaaliyeed. Weriye SNM u adeega ayaan ka ahaa.

Waannu ku celcelinney warkaasi markii uu na soo gaadhey. Warka madaxdiisa ayuu ku noqnoqday dhawr habeen, waxaanu noqday horyaalkii Wararka Toddobaadka, markii aannu sii xaqiijinnayna, waxa aannu ka sii falkinnay fallooyin badan iyo barnaamijyo markii dambena la sii jiitamey fal celintii xaaduqnimo ee Nidaamkii keli taliska ahaa oo ahayd in sidii caadadu ahayn bandow la saaro Hargeysa, la xidh xidho dad badan oo aan waxba galabsan oo qaarna kalena la iska laayo aargoosi ahaan.

Dilkaas Axmed Aadan guul buu ahaa u soo hoyatey SNM  xag milateri iyo xag siyaasadeedba. Dhinaca kalena culayskii iyo cadaadiskii dadka saarnaa ayuu sii laba jibbaarey, waxaanu galaaftay noloshii tobannaan qof oo aan waxba galabsan oo sir iyo caadba loo laayey maalmihii dhacdadaasi raadkeedu qoyanaa marka laga gudbo intii jeelasha lagu abaadiyey iyo intii hantidooda laga dhaxal wareejiyey ee la dhacay.

Iyaba beri ahayd
Badheedhe cad lahayd
Nin beer adag bay lahayd
Rag aan biqin bay lahayd
Barbaar diran bay lahyd
Baaruud qaraxday lahayd
Billaawe hub bay lahayd
Intii ba’ dhacay lahayd
Belaayo cas bay lahayd!

## Shugri Maxmauud Xuseen:

Waxaan joogay magaalada Hargeysa.Habeenkaa waxaan dareemay dhaqdhaqaaq xoog leh.Hase yeeshee aroornimadii markii aan shaqada tagey (Xafiiska Gobolka) ayaan helay warkii oo sugan.Waxaad dareemaysay xafiiska geerida raadka ay ku reebtay maamulkii xilligaa .Waxaa gabaabsi noqday xidhiihdkii sheeko ee shaqaalaha ka dhexeeyey.Waxaa la qabtay shirar badan oo lala yeehsay gudidii nabadgalyada. Waxaa lagu soo rogay goboladii woqooyi bandoo. Dareenkayga maalintaa wuxuu ah mid ku faraxsan guusha u soo hoyatey dadkii la dhibay iyo SNM-tana, haddan waxaan waxaan ka biyo diidanaa dhibta ku sii badan doonta gobolka ee yeelan doonta xadhig,dil iyo hanti la qarameeyo. Hase yeeshee qofkii aqoonta u lahaa Axmed Aadan wuu garan karaa maqnaanshihiisu inay si kastaba guul ku tahay..

Bahda mareegta Farshaxan oo qoraalkan muddo soo wadey ayaa dib idiinla wadaagi doonto qoraalo ku saabsan taariikh nololeedkii Mujaahid Bashiir oo faahfaahsan,dhacdo kale oo xilligan dhacday aheydna dhakhaatiirtii MSF ee togga Wajaale oo gacanta mujaahidiinta galay, falalkii argagaxisnimada ahaa ee ay dawladii Ina Siyaad samaysay muddadaa wixii ka danbeeyey .Waxaanan qoraalkan ku soo xidhaynaa maansada uu curiyey abwaanka mujaahidka weyn ah ee Cabdriaxmaan Cawl "Cabdiraxmaan Baqdaadi":

Umadyahay wixii loo dhintay maad dhamays tirine
Dhaliishuna xagaagay ka timi looga soo dhacaye
Waxad baal ka dhaafteen halkii dhaanka loo raraye
Dhabadaad maraysaa ma ah tii dhabta ahayde
Maad dhaadin wali xaajadaad laba dar dhaafteene
Maankaagu muu dhugan xagii dhanbala rogaye
Xilkaad dhabarka saarteen marnaba guul kamaad dhalin e
Wuxuu qaranku dhawraayey baad dhinac u tuurteene
Dhalandhoolka geediga socdee dhinacna loo diiday
Salka meel umaad dhigin hurdada lagu dhakoolaye
Dhismo iyo wuxuu kaa mudnaa dhidib an liicayne
Intuu dhabar adaygaa ku jiray way gun dheertahaye

~ ~ ~ ~~ illa dhamaadka maansada ~~ ~~

Marna uma dhagtaagtaan habkii loo dhisi lahaaye
Kii aawadaa dhiman lahaa uma dhawaataane
Inkastuu il dheeryahay shirkaa lagala dhuuntaaye
Adaan kaa dursugayaa ilaa iilka lay dhiga e
Dhaayaha haddmaad furi aduun waa habeen dhacaye.

*Tixraac:*

*-Mareegaha hadhwanaagnews, Somaliland.org, Redsea online, Ramaasnews, Oodweyne news, Gabiley News, Farshaxan, Somalilandnews.info,*

- Somalia: A Government At War With Its Own People (Afcelinta Af-soomaliga ee uu qalinka ku duugay Kamaal Axmed Cali.

-Wareisyo ay bahda mareegta farshaxan la yeelatay :
- Drs.Aamina Xaaji Aadan oo degan Cariga Maraykanka.
- Maxamed Bashe X.Xasan oo degan cariga Ingiriiska.
- Xasan Maxamed Cabdi oo degan cariga Somaliland.
- Cali Cumar Xasan oo degan cariga Holland.
- Jaamac Muuse Jaamac oo degan cariga Talyaaniga.
- Shugri Maxamuud Xuseen oo degan cariga kanada.

Waxaan dhamaan u mahadnaqeynaa dadkii sida geesinimada uga qayb qaatey inuu qoraalkani soo baxo,una kaalmeeyey siyaabo kala duwan…

Tifatirkii : Fu,aad Sh.Abuubaker
Bahda Mareegta Farshaxan

Copyright ©2003-2009 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.